Tabaha Horumarinta Bulshada Ee Magaalada Toronto

2001

SOO KOOBID

TORONTO

SOMALI

Horumarinta Bulshada Waxay Khuseysaa Tayada maciishadda

Horumarinta bulshada waxay khuseysaa, sidii loo hagaajin lahaa tayada maciishadda. Magaalada Toronto door muhiim ah ayeey ka ciyaartaa hab socodka arrimahan. Ama iyadu si toos ah wax uga qabta, ama ha la kaashato ururada bulshada, maamulka magaaladu wuxuu dadka deegaanka u qabtaa adeegyo aad u ballaran. Adeegyadaasi oo ka mid ah xanaanada caruurta, guri siinta dadka waayeelka ah, maktabadaha, goobaha jimicsiga iyo tamashleynta, guryaha dadweynaha, cafimaadka guud, iyo taakuleynta bulshada.

Magaalada waxay kaloo ka shaqeeysaa horumarinta tayada maciishadda, iyadoo lagu dhiiri gelinaayo dadka deegaanka in ay ka soo qeybgalaan go'aan qaadashada mustaqbalka.

Bisha Desembar 2001, guddiga magaalada wuxuu ansaxiyay in la sameeyo isteratejiyad lagu horumarinaayo bulshada magaalada, qorshahaani wuxuu faah-faahin ka bixinayaa sida ay ukala mudanyihiin arrimaha bulshada, wuxuuna tilmaan cad ka bixinayaa kaalinta uu ka geysan lahaa u adeeggidda iyo taakuleynta bulshooyinka.

Istiraatejiyada horumarinta bulshada waxay faah-faahin ka bixinaysaa qaar ka mid ah caqabadaha hortaagan magaalada Toronto, waxyaabaha aan wadaagno ee qiimaha noo leh isla markaasna, na wada xiriiriya oo isku kaaya tola magaala ahaan, iyo mabaadii'da salka u ah sida aan wax u qabano ee la xiriira horumarinta bulshada. Taasi waxay kaloo, u gogol xaareysaa, tilmaana ka bixineysaa tabo gaar ah oo lagu jiheyn doono habsocodka qorshaha magaalada Toronto.

Caqabadaha Horyala Toronto

Toronto waxay leedahay tariikh soo jireen ah, oo ay ku guuleesatay iyadoo leh hab isku dhexjir ah, oon cidna ka tageynin, lehna dhaqan magaalo oo fara badan, taasoo u ogolaatay dadka deggan fursad dhaqan-dhaqaale ee wax ku ool ah. Hase yeeshe magaalada waxaa haddana horyaala dhor arrimood oo ku ah caqabado waaweeyn, caqabadahaasi oo wax u dhimaaya sumcaddeeda:

- Waxaa aad u kala fogaanaya tirada dadka wax haysta iyo dadka aan waxba haysanin, waxayna qalqal gelineysa tayada nolosha ee dhamaan degganyaasha magaalada. Waxaa si argagax leh u batay dadka aan guryo degganeyn iyo saboolnimada caruurta. Kala sareynta dakhliga oo iyaduna kordheysa.
- Dowladda dhexe iyo tan golbolkaba oo faraha kala baxeen maalgelin badan oo ka mid ahaa mas'uuliyaddoodi soo jireenka ahayd oo ay ku malgelin jireen borogaraamyada bulshada, gaar ahaan kuwa khuseeya qeybinta dakhliga iyo gurisiinta ba.
- Maalgelin cusub iyo mas'uuliyad mamulka ee borogaraamyada ma dhaafanka ah ee bulshada, waxaa lagu soo warejiyay maamulka maagalada, taasoo dheeraad ku ah waajibaadkeedii hore ee dhaqanka u ahaa sida caafimaadka guud iyo jimicsiga iyo tamashalaynta.
- Maamulka magaalada waxaa lagu soo koobay in uu isticmaalo canshuurta hantida iyo ujuurada uu bixiyo isticmaalaha adeegga, si ay u fuliso waajibaadkeeda.

Haddii aan maamulka magaalada la siinin taakuleynta uu u baahanyahay, bulshaduna ay kari weyso in ay haqab tirto baahideeda kana gudubto caqabadaha hor taagan, waxa lama huraan noqoneysaa in ay hoos u dhacdo dhamaan nolosha degganayaasha magaalada.

Mabaadi'da Horumarinta Bulshada

Ujeedada ugu dambeysa ee laga leeyahay Istiraatejiyada Horumarinta Bulshada waa in la hagaajiyo, sarena loo qaado dhamaan tayada nolosha dadka. Shan tiirar ayaa lagu hoggamin kara istiraatejiyada:

- **Eex La'aan** — In si caddaallad ah loo qeybiyo hantida, lagana madax baneyo takoorid ku saleysan da', kartidaro, jinsi, martabad dhaqaale, sinji, ummad, diin, ama nooca ay u galmmodaan.
- **Sinnaan** — simman, hirgelinta xuquuq baahsan oo loo dhanyahay.
- **Sahlidda Adeegga** — caddallad iyo in loo sinaado helidda adeegga oo idil, si aanan cidna looga gaabinin oon laga hoos marinin heerarka xaddidan ee lagu qiyaasay nolosha hoose, taasi waxaa ka mid ah dakhli ku

filan, cunto nafaqo leh oo ku filan, guri ijaarkiisu la bixin karo, iyo arad bax ku fialan.

- **Ka qeybgalid** — helidda fursad ee si buxda looga qeybgalayo nolosha magaalada iyo go'aan ka gaarrideeda kaasoo xaqiijinaaya aayatiinka wadajir keena.
- **Midnimo** — Buun buuninta iyo kobcinta kalsoonida mujtamaca, isweydaarsiga tixgelinta iyo isdaryeelidda , iyo iskuixtiraamka kala duwanaata dhaqan iwm in ay tahay saldhigga bulsho isku tiirsan oo istaakuleyneysa.

Jiheynta Istiraatejiyada

Magaalada Toronto waxay la tashatay bulshada deegaanka, khabiirada qorsheynta, hay'adaha adeegga, si ay u cayimaan arrimaha bulsahada ugu muhiimsan iyo sida ay u kala mudanyihiin, iyo in ay tilmaan ka bixiyaan sidii loo qaban lahaa howlaha mustakhbalka.

Istiraatejiyada Horumarinta Bulshada waxay ka koobantahay tilmaamaha lagu soo jeediyay istiraatejiyada soo socota:

Xoojinta Bulshooyinka

- **Si fir-fircooni ku jirta u taakuley dhismaha kartida bulshada**
  Magaaladu waa in ay:
  - Dib u cusbooneeyn siisaa ku talagalkeeda ahaa hab isku dhaf ah oo bixiya adeegga aadanaha, kaasoo ay magaalada iyo hay'adaha u adeega bulshada masuuliyaddeeda ay wadaagii doonaan, sidi loo bixin lahaa barnaamijyo iyo adeegyoba;
  - In la helo maalgelin joogta ah si loo caawino shaqeynta hab debacsan, deg-degna u haqabtiri kara baahida aadeegga ee bulshada;
  - Waa in ay joogteyso dheelitirtana masuuliyadeeda labada waji leh, taasoo ah iyadoo maareyneysa hababka adeegga iyo iyadoo si toos ah adeeg u fidineysaba;
  - In ay taakuleyso in la dhiso istratejiyad ay ururada bulshada iyo hay'adaha kaleba u shirkoobaan isuguna bahaystaan wadashaqeeyn ay si hufan ugu adeeggi lahaayeen uguna doodi lahaayeen bulshada; iyo
  - In la helo shaqaale loo carbiyay in ay taakuleeyaan dhismaha kartida bulshada.

- **In lagu dhiirageliyo ka qeybgalidda bulshooyinka iyo dowladda**
  Magaaladu waa in ay:
  - Kobcisaa kuna dhiirigelisaa dhamaan qeybaha bulshada in ay ka soo qeybgalaan habka go'aanqaadashada;
  - Ka caawiso, in bulshada laga dhex abuuro hab cabbiraaya "dareen ka mid ahaasho deegaan", iyadoo siineysa dadweynaha xogwarran iyo tababbar ku saabsan sida ay magaaladu u shaqeeyso iyo sida ay ayagu uga qaadan karaan kaalin firfircoon;
  - Isticmaashaa hab quruxbadan oo hadane aan adkeyn oo lagu wargeliyo dadweynaha iyo tikniko war isgaarsiin oo baahsan, taasoo gaari karta dhamaan qeybaha ay ka koobantahay bulshada;
  - In la hubiyo in ay dadweynahu isticmaali karaan tas-hiilaadka caamka ah ee bulshada ayna u isticmaali karaan shirarka, jimicsi iyo tamashleyn, arrimaha dhaqanka iyo cadooyinka iyo aqoon kororsi ba;
  - Dhiiragelisaa fikradaha siyaasadda iyo dareen xileed oo naga saaran heerka derisnimada; iyo
  - In la raadiyo lana tixgeliyo ra'yiga bulshada marka la eego arrimaha ay dadweynuhu xiiseynayaan.

- **In la kordhiyo helitaaka goobaha bulshada**
  Magaalada waa in ay isku taxalujisaa in la badiyo helitaanka goobaha bulshada iyadoo:
  - Laga dhigo meelaha caamka ah ee ay leedadahay magaladu, mid u furan dadweynah in ay isticmaalaan iyadoo shuruudaha lagu bixindoono laga dhigo mid macquul ah; iyo
  - Iyadoo loo doodaayo in dowladda gobolka ay aqoonsato in ay iskuuladu yihiin goobo bulsho iyo in loo aqoonsado qarashyada la xiriira isicmaalka bulshada ay istimaalayaan iskuulada.

Maalgelin Howlaha Bulshada Iyadoo Loo Eegaayo Si Isku Jir Ah

- **In la cayimo waxyaalaha u baahan in si istratejiya ah loo maal geliyo, si loo horumariyo bulshada**
  Markii la tashi lala yeeshay bulshada, maagaaladu waa inay cayintaa meelaha muhiimka ah ee la maalgelin karo taasoo si muuqata u hagaajineysa tayada caafimaadka iyo bad qabka dadka iyo bulshadaba. Go'aamada maalgelinta waa in lagu qoondeeya baahida bulshada iyo mabaadi'da sahlidda adeeg loo simanyahay iyo dhamaan tas-hiilaadka ka jira magaalada.

- **In si buuxda loo kordhiyo, wax qabadka iyo maamulidda qorsha howleedka**
  - Magaaldu waa in ay isticmaashaa dhamaan tabaha qorsheynta iyo toosinta si loo dhiirigeliyo taabbagalka dhismo bulsho iyo haqabtirka baahideeda.
  - Dhamaan qeybaha bixiya adeegga bulshada waa in ay si aad ah uga wadashaqeeyaan qorsheynta hababka adeegyada, si loo haqabtiro baahida bulshada ee goobah degaanka iyo magalada guud ahaanba. Qeybaha kala duwan iyaguna waa in ay sameeyaan isku xir iyo wadashaqeeyn iyo in ay iskuna dhafaan qorsheynta iyo gudbinta adeegyadooda iyo in ay u wada isticmaalaan si wada jir ah goobaha bulshada.
  - Ururrada bulshada iyo ururrada qorsheynta waa in la maalgeliyaa si ay u qabtaan howlaha qorsheynta arimaha bulshada iyo si ay uga shaqeeyaan tilmaan-bixiyeyaal lagu horumariyo kartida bulshada iyo bad-qabidda.

- **Dabagal iyo ka warbixin baahsan ee arrimaha bulshada**
  Adeegyada bulshada iyo dersaalaha, waa in la joogteeyaa si ay door muhiim ah uga qaataan horumarinta iyo cusbooneyn siinta fulinta dabagalka socodka howlaha bulshada iyo qalabka looga warbixiyo, sida kaararka warbixinta "Report Cards". Rebor kardisku waa in ay yeeshaan calaamado warbixineed oo isku dhaf ah oo la xiriira himilo gaar ah oo la doonaayo in la kobciyo. Qalabkani waxuu kaa caawinaayaan in ay soo muuqato meelaha u baahan maalgelin istiraatijiyadeed iyo iyadoo tusaale ka bixineysa hababka qorsheynta ee waaxaha.

  Tilmaamaha dabagalidda waxaa ka mid ah:
  - Tilmaan bixiyeyaal qiimeeya caafimaadka iyo bad qabka dadka iyo bulshada ba iyadoo la saaraayo culeys gaar ah bulshooyika tabarta yar; iyo
  - Tilmaan bixiyeyaal oo cabbiraaya koboca horumarinta bulshada, kuwaasoo si toos ah ay u fahmi karaan guddiyada bulshada arki karaane faa'iidadiisa.

- **Qiimeynta Horumarka Barnaamijka**
  Madaama ay tahay qeyb ka mid ah xilkooda si loo helo hab dabacsan hadane ka tarjumaaya hababka u adeegidda aadanaha, magaaladu waa in ay:
  - joogteysaa ka shaqeynta hab qiimeyn ah oo turxaanbaxsan, hab wax ku ool oo ku jaan go'an qiimaha barnaamijka si loo gaaro waxyaabihii lagu waday in laga helo; iyo
  - in loo isticmaalo waxyaabaha ka soo baxa qiimeyntaasi in si joogta ah loogu horumariyo qorshaha adeegga iyo fidintiisaba.

- **In la raadiyo ilo laga helo dakhli xaqaani ah oo hadana bad-baddalmi kara**
  Magaaladu waa in ay raadisaa awood ay ku hirgelin lahayd soo saaridda dakhli cusub iyo habkii loo wadaagi lahaa, hab buuxin kara in uu noqdo dhexdhexaad isla markaasna ku filan waxyaalaha loogu talagalay in lagu qabto iyo mas'uuliyaddedaba.

Ballarinta hogaaminta deegaanka iyo ka qeybgalkeedaba

- **Ka shaqeey hab loo wada dhanyahay ee lagu horumariyo bulshada ku nool Magaalo Weynta Toronto**
  Toronto waa in ay si wada jir ula shaqeeysaa dowladaha hoose ee degmooyinka kale ee ku yaala Magaalo Weynta Toronto si ay u helaan hab wada maamulid oo isku-dubba ridan oo looga shaqeeyo horumarinta bulshada iyo bixinta adeegga aadanaha.

- **La shaqeey dowladaha hoose ee degaanada kale si loo horumariyo agendaha qaran ee magaalooyinka**
  Magaaladu waa in ay joogteysaa in lala shaqeeyo dowladaha hoose ee degaanada kale ee magaalo weynta Toronto, Ontario, iyo dhamaan waddanka Kanada, sidoo kale waa in lala shaqeeyaa ururada degmooyinka si:
  - dib loogu qeexo awoodda magaalooyinka iyo xiriirka ka dhexeeya dowladaha kale; iyo
  - looga dhaadhiciyo dowladda federaaliga ah in la yeesho agendo qarameed ee arrimaha magaalooyinka, iyo in laga qaato door fir-fircoon sidii loo taakuleyn lahaa dhismaha magaalooyinka dhinac bulsho iyo dhinaca muuqaalka ba.

- **Xoojinta kaalinta magaalada ee u doodidda danaha**
  Madaama ay la shaqeeyso dhamaan qeybaha bulshada, magaalada oo isticmaaleysaa saraakiisheeda sare, in la siiyo awood ku filan iyo maal iyo qalab ba si ay u maamulaan una maalgeliyaan adeegyada degmooyinka iyo bulshada. U doodidda magaalada waa in ay salka ku haysaa shuruudaha soo socda:
  - Dowladda gobolka waa in ay isku taxalujisaa in ay taakuleeyso maaliyad ahaan qeybaha ugu muhiimsan ee dhismaha muqaalka sida guryaha dadweynaha, oo kiradoodana la bixin karo; iyo
  - Dowladda federaliga ah waa in ay dib-u–soo bandhigtaa awooddeeda hoggaan ee looga baahanyahay iyo kaalinteeda laga arko meelo muhiim ah ee mas'uuliyaddeeda bulsho sida guryaha, xanaanada carruurta, iyo socdaalka iyo adeegga dejinta.

Haddii aad faah-faahin uga baahantahay istiraatejiyada horumarinta bulshada:
Talefoon — 416-392-5617 • Fakis — 416-392-8492
E-mail — socdev@city.toronto.on.ca • Website —www.city.toronto.on.ca/sds